



## waxaa imaan doona kuwo madaxa oo samayndoona waxaad ku raacsan tiiin iyo waxaad ku diidan tiiinba, qofkii ku raaca wixii saxa wuu is beri yeelay, qofkii ku diida wixii khalad ahna wuu badbaadey, laakiin khaladku waa qofkii xumaha ku raaca

Umu salama, muuminiinta hooyadood-Allaha ka raali ahaadee- waxay Rasuulka-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- ka warisay inuu yiri: "waxaa imaan doona kuwo madaxa oo samayndoona waxaad ku raacsan tiiin iyo waxaad ku diidan tiiinba, qofkii ku raaca wixii saxa wuu is beri yeelay, qofkii ku diida wixii khalad ahna wuu badbaadey, laakiin khaladku waa qofkii xumaha ku raaca oo ku raali noqda, waxay yiraahdeen: ma la diriraynaa? wuxuu yiri: maya, inta ay tukanayaan".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Rasuulku-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu inoo sheegay inay ina maamuli doonaan madax samayndoona shaqo aanu naqaan waafaqsana sharciga aanu naqaan, waxay kaloo samayn doonaan shaqo aan ku diidayno waayo waxay khilaafsan tahay sharciga. Qofka qalbigiisa ka diida munkarka ee aan awoodin inuu ka hadlo diidana, danbiga iyo nifaaqa bari ayuu ka noqday. Qofka awooda inuu madaxda ku diido gacan ahaan ama carab ahaan ee madaxda ku diida xumaha wuu ka badbaaday macsida iyo inuu ka qaybqaato xumaha. Laakiin qofka ka raali noqda ee ku raaca xumaha wuu halaagsamin siday u halaagsameen. Hadana waxay waydiyyeen Rasuulka-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-inay la dagaalamaan madaxda xaalkuudu sidaa yahay?, wuuna u diiday Rasuulku arinkaa, wuxuuna ku yiri: maya, intay salaada idinla oogayaan.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3481>